Badbaadada Dabka

Fire Safety for Newcomers in Somali

1. Baro telefoonka caawimada. Gurmadka, garaac 911 oo sheeg magacaaga iyo goobta gurmadka.





2. Waaxda dabku waxay ka jawaabtaa dhammaan gurmadyada oo waxay halkan u joogaan inay ku caawiyaan.

3. Haddii uu dab ka jiro gurigaaga, waaxdu waxay u baahan doontaa macluumaadka ku saabsan sida uu dabku ku bilaabmay si ay uga hortagto kuwa kale inay meelo kale ka dhacaan.

4. Digniinta qiiqa iyo kaarboon mono ogsaydhka waxa uu kaaga digaa khatar. Hubso inaad leedahay digniinta qiiqa iyo kaarboon mono ogsaydhka gudaha gurigaaga si loo ilaaliyo qoyskaaga. Tijaabi bil kasta oo haddii ay baytari ku shaqeeyaan beddel baytariyada labba jeer sanadkii.








5. Haddii digniin baxdo ka bax dhismaha isla markaaba.

6. Samayso qorshaha BIXIDA gurigaaga oo garo meesha lagula kulmayo qoyskaaga dibada haddii uu jiro dab. Ku celceli 2 dariiqo ee loga baxo. Xaalada dabka waxaad keliya haysataa 2 daqiiqadood oo aad gurigaaga kaga baxdo.







7. Haddii uu jiro qiiq ama dab, hoos ugu deg sagxada oo soco, lug hakaga bixin dhismaha ololaya. Hawada wanaagsan iyo araga waxa uu u dhow yahay dhulka.

8. KA BAX OO KA JOOG. Weligaa dib ha u soo gelin dhisme gubanaya si aad u raadiso dad, xawayaan rabaayad ah ama waxyaabo aad haysato. Ogaysii dab demiyayaasha haddii qof weli ku jiro dhismaha.

9. 2 dariiqo gurigaaga uga bax Ha musbaarin albaabada iyo daaqadaha Waxay noqon karaan albaabkaaga bixida degdega ah.





10. Dabool saar dadka wax karinta, ka dibna demi kulaylka. Weligaa biyo ha ku shubin dadka shidaalka ku baxa hana ka saarin shooladda.

11. Had iyo jeer joog kijada marka wax la karinayo. Weligaa wax karina oo aan la agjoogin ha ka tegin





12. Ka feejignow waxaad ku lebisato markaad wax karinayso. Xidho dhar kugu dhejisan marka aad wax karinayso. Dharka balaqsan si fudud ayuu dabku u qabsadaa.

13. Sii jeedi gacmaha weelka, yaanay ka soo laalaadin qarqarka meesha wax lagu karinayo.

14. Ka safee shooladda waxyaabaha yaryar, warqada, tuwaalada iyo xaydha.

Badbaadada Dabka

Fire Safety for Newcomers in Somali






15. U isticmaal haashtaray wayn sigaarka. Baqtii sigaarka dhammaan jidka.

16. Weligaa sigaar ha ku cabbin sariirta. Way badbaado badan tahay haddii dibada lagu cabo

17. Ka fogee biyaha kulul meel carururtu gaadho.


18. Biyaha kulul waxay u guban karaan sida dabka. Had iyo jeer tijaabi biyaha ka hor inta aanay cidi ku qubaysan.





19. Gubashooyinka yaryar, isla markaa ku shub biyo qabow dushooda ugu yaraan 10 daqiiqadood ka dib wac 911.

20. Weligaa aad ha u wada gelin bareesooyin iyo fiishta. Weligaa ha gelin dab wax ka badan labba xadhig qaybisada korontada.







21. Weligaa ha gelin xadhkaha dabka marinka albaabka ama hoosta roogaga.

22. Ha adeegsan walxaha korontada gudaha iyo biyaha agtooda ama baadka qubayska.









23. Meelaha kulayliyahu waxa uu u baahanyahay meel Ku hay waxyaabaha guban kara, ay ku jiraan carruurta iyo xawayaanka rabaayada ah, ugu yaraan meel ka fog 1 mitir (3 fuudh).

24. Weligaa ha ku isticmaalin baatrool guriga gudahiisa ama inaad wax ku kariso. Uumi baxa baadroolku si xad dhaaf ah ayay u ololaan oo waa in la dhigaa meel dibada ah.







25. Hadduu dab qabsado dharkaaga, JOOJI, TUUR, DABOOL iyo WAREEJI.



26. Taraqyada iyo walaacadaha ka fogee carruurta. Bar carruurta inay qof wayn u sheegaan marka ay helaan taraqyo iyo walaacaado.

Department of Fire Services
www.mass.gov/dfs • (978) 567-3100

Images: U.S. Fire Administration 11/20